



Nagu kaalmee in aan wax badan ka ogaano baahida Maine!

Sadaqadaan raashinka waxay iskaashi la samaysay Good Shepherd Food Bank si ay wax uga ogaato dadka la kulma baahida. Marka aad ka qeybgashid aruurintaan xogta, waxaad nagu kaalmeyn doontaa in aan gaarno go'aano ku dhisan caqli oo ku saabsan adeegyada aan bixino, iyo sidoo kale in aan helno ilo kaddibna qorsheysano mustaqbalka.

MAXUU YAHAY SIISTEMKA CUSUB

Wakaaladaan waxay adeegsataa Link2Feed si ay uga shaqeyso qabashada una diiwaan geliso adeegyada. Link2Feed waa brograam elataroonig oo si gaar ah loogu samayay ururada samafalka baahida si loo hagaajiyo adeegyada ay siiyaan macaamilkooda.

Waxay si sugan u soo aruurisaa, maamushaa, iyo u keydisaa macluumaad. Waxay kaloo wakaaladaan ku kaalmeynsaa in ay yareeyso isticmaalka warqadda, soo saarto warbixin, iyo in ay hesho maalgelin.

SIDEE AYAAD U GEYSAN KARTAA KAALMO

Dhamaystir su'aasha qabashada halka-mar si aad noogu kaalmeysid in aan si wanaagsan u fahamno waayahaada. Kaddibna waxaa dhakso iyo hawl-karnimo diiwaanka loo gelin doonaa booqashooyinkaada mustaqbalka. Waxaan rajeyneynaa in aad dooratid in aad ka jawaabtid hase ahaatee haddii aad diidid in aad ka jawaabtid qaar ama dhamaan su'aalaha, taasi ma saamayn doonto adeegyada lagu siiyo. *

* Waxaa lagu dabaqi karaa sharuudaha Waaxda Beeraha Mareykanka (USDA, United States Department of Agriculture) / Brograamka Kaalmada Raashinka Degdegga (TEFAP, The Emergency Food Assistance Program)

XILKA AAN ISKA SAARNAY XOGTENA:

❖ WAXAAN ISTICMAALI DOONAA OO KELIYA MACLUUMAADKAAN SI AAN ADIGA KUU SIINO ADEEGYO KA SII FIICAAN.

Marka aad macluumaad na siisid, waa adiga oo nagu kaalmeyay in aan wax ka ogaano bulshada aan u adeegno iyo in aan hagaajino adeegyada aan bixino.

❖ WAXAAN ILAALIN DOONAA AMMAANKA IYO SEKURITIGA MACLUUMAADKAADA.

Waxaan ilaalin doonaa dhamaan macluumaadka macaamilka ilaa inta ay na gaarsiiso awooddena. Qofka la xariiri doono macluumaadkaada wuxuu sidaan u samayn doonaa oo keliya in uu diiwaanka geliyo adeegyada la bixiyo ama in uu casriyeyo xogtaada. Ma jiro qof dibadda ka ah shabakada iskaashiga aan la qeybsan doono macluumaadka qofka ama macluumaadka lagu aqoonsan karo qofka.

❖ WAXAAN KUULA DHAQMI ADIGA IYO MACLUUMAADKAADA SI SHARAF LEH IYO XUSHMAD.

Waxaan xushmeen doonaa xulashadaada in aad macluumaad na siisid. Waxaan ku kalsoonahay jawaabahaada mana dhici doonto in macaamilka loo diido adeeg ama in la baddalo ama la yareeyo adeeg maxaa yeelay wuxuu doortay in uu bixiyo ama in uusan bixinin macluumaad inta ay socotay qabashada.

